

Bixinta kiradaada

You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. Fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng chữ lớn, bằng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。 [Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]



Awarded for excellence



INVESTOR IN PEOPLE



North River Alliance

Gateway Housing Association

409-413 Mile End Road, London, E3 4PB

Residents: 020 8709 4300

General enquiries: 020 8909 4409

Fax: 020 8709 4400

Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk

www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.

Paying your rent
– Somali translation

gateway
housing association

Maadaama aanu nahay hantiilaha gurigaaga leh, waxaanu doonaynaa inaanu ku siino adeegga kirada ee ugu wanaagsan.

Adeegayagu wuxuu:

- soo ururiyaa kiradaada;
- bixiyaa doorashooyin badan oo kala duwan oo ah bixinta kiradaada;
- bixiyaa talo ku saabsan sida loo dalbado Dheefta Kirada Guryaha iyo dheefaha kale;
- ku siin karaa talo ku saabsan wixii deyn ah ee laga yaabo in lagugu leeyahay;
- bixiyaa kaadhka bixinta kirada oo cusub ama bedel ah;
- ku siinayaa warbixinaha kirada oo cusub;
- kaa caawin karaa haddii aad dib ula dhacday bixintii kiradaada;
- kuu celinayaa kiradaada, meeshii ay haboontahay; iyo
- ku haynayaa macluumaadkaaga si qarsoodi ah.

Sida loo bixiyo kiradaada

Waxaanu soo bandhignaa dhowr siyood oo aad ku bixinayso kiradaada.

- **iyadoo akawnkaaga si toos ah loogala baxo** – akawnkaaga bangigu toos u bixiyo.
- **Internetka** – booqo www.allpay.net, kadibna isticmaal kaadhkaaga bixinta kirada si aad ugu bixiso kaadhka amaahda.

- **Telifoon ahaan - adeegga otomaatika ah** – soo wac 0870 770 0472, kadibna isticmaal kaadhkaaga bixinta kirada si aad ugu bixiso kaadhka amaahda.

- **Telifoonka - telifoon ku bixinta** – shaqaalahayaga waxa imika loo tababaray inay lacagta ku qabtaan telifoonka guudkiisa. La soo hadal telifoonka ah 020 8709 4300 adiga oo siinaya lambarka kaadhkaaga kirada ama lambarka tixraaca ee deganaanshahaaga. Waxaad ku bixin kartaa in kasta illaa iyo £4,000 adiga oo isticmaalaya kaadhka deynta. Haddii uu bangigu ogolaado bixinta lacagtaada, waxaanu ku siin doonaa lambarka xaqiijinta.

- **Adiga oo isticmaalaya kaadhkaaga bixinta kirada** – eeg jadwalka ka soo horjeeda.

- **Farriin Qoraal ahaan ah** – waxa kale oo aad kiradaada ku bixin kartaa farriin qoraal ah. booqo <https://www.allpayments.net/textpay> si aad u aasaasto akawnkaaga. Kadibna farriin qoraal ahaan ah ku bixi lacagta iyo koodhka iyo lambarkaaga sirta ah adigoo u diraya 81025.

- **Boostada** – waxaad jeeg ama boonooyinka boosta noogu soo diri kartaa Gateway Housing Association, 409-403 Mile End Road, London, E3 4PB.

- **Ka bixin kartaa xaffiiskayaga** – waxa keliya oo aanu aqbalnaa jeegaga.

- **Dheefta Kirada Guryaha** – haddii aad qaadata Dheefta Kirada Guryaha si kiradaada ay u bixiso, waxaad qabanqaabin kartaa in anaga si toos ah naloogu soo shubo.

Meelaha aad ku isticmaali karta kaadhkaaga kirada si aad kiradaada ugu bixiso



| Xaggee? | Kaadhka deynta | Jeeg | Kaash |
|-------------------------------------------|----------------|----------|-------|
| Boos kasta | Maya | Haa | Haa |
| Meel ay ku qorantahay calaamadda PayPoint | Maya | Qaarkood | Haa |
| Meel ay ku qorantahay calaamadda PAYzone | Qaarkood | Qaarkood | Haa |
| Meel ay ku qorantahay calaamadda e-pay | Qaarkood | Qaarkood | Haa |

Haddii ay Dheefta Kirada Guryuhu bixiso qayb kamid ah kiradaada oo keliya, waxaad u baahantahay inaad inta hadhay bixiso adigoo isticmaalaya mid ka mid ah hababka sare.

Ahdaaftayada adeegga

- **Warbixinaha Kirada** – waxaanu kuu soo diri doonaa warbixinta kirada saddexdii biloodba mar iyo warbixinta kirada ee ugu dambaysay markasta oo aad mid codsato.
- **Celinta kirada** – haddii akawnkaaga kirada lacag dheeraad ahi ku jirto, waanu kuu celin doonaa lacagtan haddii aad naga codsato.

Waxaanu kugula soo xidhiidhi doonaa laba toddobaad illaa saddex toddobaad gudahood markaad dib ula dhacdo bixinta kiradaada.

Waxaanu ku siin doonaa afar toddobaad oo ogeysiis ah si aanu kuugu sheegno kordhitaanka kirada ee sannadka iyo lacagaha adeegga.

Haddii aad bixin weydo

Haddii aad lacagaha kirada dib ula dhacdo, waa inaad ogaataa in:

- haddii aad dalbatay bedel ama xuquuqda aad guriga ku iibsantayso, taas la joojin doono;
- aad lumin doonto xuquuqdaada aad guriga kaga bedelan karto qof kale oo deggan; iyo
- aad lumin karto gurigaaga.

Haddii aad kiradaada dib ula dhacdo, nagala soo hadal telifoonka ah 020 8709 4300 isla markiiba si aanu talo kuu siino.

Haddii aad u baahantahay macluumaad dheeraad ah, caawimo ama talo, fadlan la soo hadal kooxda adeegga macaamiisha 020 8709 4300.